Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa caddeeyay inay uga qayb-gelayaan shirka lagu qabnayo Magaalada Kismaayo si mug leh oo dhameystiran maadaama u yahay shir Dastuuri ah oo lagu xoojinayo wada-shaqeynta Dawladda Federaalka iyo Dawlaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa caddeeyay in Dastuurka KMG ah ee Dawladda Federaalku uu si faahfaahsan u qeexayo iskaashiga heerarka Federaalka, sidaa awgeed Dawladda Puntland ay si buuxda uga qayb noqon-doonto shirka lagu qaban-doono Caasimada KMG ah ee Maamulka Jubbaland.

Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa sheegay in shirarka iyo kulamada Maamulada iyo Dawladda Federaalku uu ka mid yahay mid lagu xoojinayo hannaanka Federaalka iyo midnamada dalka, sidaa darteed ay tahay wax loo baahan yahay inay kulmaan mar walba oo ay soo kordhaan xaalado u baahan wada-tashiyo dheeraad ah.

**Qaabka Wada-shaqeynta Wasaaradaha Federaalka iyo Wasaaradaha Puntland.**

Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa maanta u sheegay golaha xukuumadda Dawladda Federaalka inay waxka-badelaan qaabka ay u shaqeeyaan gaar ahaan Anxisinta xeerarka ee ay anxisiyaan, wuxuuna goluhu ku tilmaamay hab-dhanka hadda ay ku dhaqmaan xukuumadda dhexe mid tilmaan u ah Dawlad aan Federaal ahayn, taasoo keeni doonta xeerka ay Ansixiyaan xukuumadda federaalku mid ku koobnaan doona Muqdisho haddii aan wax laga badelin .

Sidoo kale wuxuu goluhu u sheegay golaha xukuumadda federaalka in ay la yeeshaan wad-shaqeyn Wasaaradaha dhigooda ah ee Puntland ayna joojiyaan gacan-togaaleynta ay sameeyaan mararka qaarkood.

**Arrimaha Siyaasadda Dalka.**

Goluhu waxay tilmaameen in deganaanshaha Soomaaliya uu yahay mid muqadas ah lagana soo maray marxalo aad u xanuun badan oo lagu waayay naf, maal iyo waqti badan sidaa awgeed ay tahay in laga fiirsado ficil walba oo la qaadayo.

Waxay goluhu ku dheeraadeen sidii Puntland ay mar walba qayb uga ahaan lahayd xasiloonida dalka Soomaaliya, si taas looga dhabeeyo waxay goluhu marxaladaan adag sheegeen in dhammaan shaqooyinka siyaasadeed loo wajaho si wadajir ah, gaar ahaan tan Soomaaliyada iyo mida Puntland-ba.

**Ansixinta Xeerka Hoosaadka Golaha Wasiiradda**

Golaha Xukuumadda ayaa maanta Ansixiyay xeer Hoosaadka golaha wasiiradda, xeerkaan oo ah xeerkii saddexaad ee ay golaha wasiiradu yeeshaan ayaa waxaa lagu sameeyey waxka-bedel ballaaran isagoo fududeyn-doona hawl maalmeedka golaha wasiiradda Puntland

**Xafiiska Afhayeenka Madaxtooyada Dawladda Puntland**
**E-mail: -** spk.oop@plstate.so, spofgovpl@gmail.com
**Website:** www.plstate.so